



Jadeeco

Jadeecadu waa cudur daran oo uu sababo fayras faafa. Waxay noqon kartaa mid khatar ah marka gaar ahaan loo eego ilmaha, caruurta yaryar iyo haweenka uurka leh.

Qaadista Jadeecada

Jadeecadu waxay si fudud ugu faaftaa marka qof cudurka qaba uu neefsado, ufaco ama hindhiso.

Fayrasku wuxuu ku nagaan karaa hawada iyo sagxadaha dushooda ilaa iyo 2 saacadood. Jadeecada waxaad ku qaadi kartaa oo keliya inaad ku jirto qol uu qof cudurka qaba uu joogay, xitaa ilaa 2 saacadood ka dib marka uu ka baxo.

Qofka jadeecada qaba wuxuu faafin karaa infekshanka 4ta maalmood ka horeeya intaysan isku arkin nabaro ilaa 4 maalmood ka dib marka finanku soo ifbaxaan.

Astaamaha jadeecada



finan



qandho



cunto xumo



xanuun, indho guduudan



qufac

Astaamaha kale ee xilliga hore soo baxa waxaa ka mid ah hindhiso iyo diif ama sanko oo qofka xirnaado. Qofka jadeecada qaba waxa uu dareemi doonaa caafimaad daro. Waa inay ku qaataan sariirta qiyaastii shan maalmood waxayna ka maqnaan doonaan dugsiga ama shaqada ilaa 2 toddobaad. Ma jirto wax daawayn ah ama daawo oo ay leedahay jadeeco.

Haddii aad u malaynayso inaad qabtid jadeeco, waa muhiim inaad wacdo dhakhtarkaaga.

Waxaad u baahan doontaa inaad ka fogaato dadka kale si aad uga fogaato inaad faafiso cudurka.

Dhibaatooyinka suurtagalka ah



dhaga beel



indhoole



burukiito



maskaxda oo ku soo bararto



dhaawac maskaxeed




dhimasho

Haddii ay kugu dhacdo jadeeco intaad uurka leedahay, waxay dhaawici kartaa ilmahaaga. Waxay keeni kartaa in ilmaha kaa soo dhoco ama inuu ilmaha uurka ku dhinto, dhashis ilmo aan shinkiisi dhamaanan, ama dhallaankaaga oo miisaankiisu hooseeyo.


Fayraska jadeecadu waxa kale oo uu weeraraa habka difaacaaga jirka, isaga oo baabi'inaya unugyada dhiiga cad ee gaarka ah ee sida degdeg ah uga falceliya si ay ula dagaallamaan caabuqyada aad horey u qabtay. Tani waxay ka dhigan tahay in dadka ay jadeecada ku dhacday ay aad ugu dhow yihiin inay qaadaan cudurro kale, xitaa kuwo horey ugu dhacay. Saamayntani waxay socon kartaa ilaa 3 sano kadib marka laga bogsado jadeecada.

Tirakoonka Jadeecada

9 ka mid ah 10-kii qof ee aan la tallaalin ayay ku dhici doonta jadeeco haddii ay si dhow ula falgalaan qof cudurka qaba.



5tii qof oo ay jadeecada ku dhacda 1 ayaa laga dhigaa isbitaalka.



15kii carruur ee ay ku dhacdo jadeeco 1 ayaa kala kulmi doona hal dhibaato ama wax ka badan.



5,000kii qof oo ay jadeecada ku dhacda 1 ayaa laga yaabaa inuu u dhinto.



Ka hortagga jadeecada

Tallaalka MMR waa qaabka kaliya looga hortago jadeecada.

Qof walba wuxuu u baahan yahay laba kuuro, waxaa la doorbidi in la siiyo marka uu jiro 1 sano iyo marka uu jiro 3 sano 4 bilood. Tallaalka MMR wuxuu kaloo qofka ka difaaca qaamo-qashiirta iyo rubella.

Tallaalka MMR si fiican ayay u shaqeysaa. Marka la qaato 2 kuuro ka dib, 99% dadka ayaa laga difaaci doona jadeecada.

Tallaalku waa mid lacag la'aan uu ku heli karo qof walba. Haddii adiga ama ilmahaagu aad seegaan kuure, la xidhiidh dhakhtarkaaga si aad u hesho. Marnaba kama weynaansid inaad qaadatid tallaalka.


kuuraha 1aad da'da 1



kuuraha 2aada da'da 3 sano iyo 4 bilood



Xog dheeraad oo ku saabsan jadeecada



(nhs.uk)

Xog dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka MMR



(nhs.uk)

Tirada kiisaska jadeecada



(gov.uk)

Kani maaha qalab lagu baadho. Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu qabo jadeeco, wac dhakhtarkaaga ama 111 isla markaaba.

Waxaa diyaariyay NHS North Central London Integrated Care Board.